

Ka-warbixinta Xadgudubka iyo Dayacaadda

Warbixinta Gaaban ee Daryeel Bixiyaha

Nof 2018



Ma ogtahay?

Xadgudubka jireed, galmo iyo dhimir; iyo sidoo kale dayaca, dayrinta, iyo dhiigmiirashada maaliyadeed ayaa waxaa ay maalin kasta saameeyaan shakhsiyaadka qaba naafonimada koriinka iyo caqliga.

Daryeel bixiyeyaasha:

- Waxaa ay awood u leeyihiin in ay gacan ka geystaan ka hortagga xadgudubka, dayrinta, dayaca iyo dhiigmiirashada maaliyadeed ee dadka waaweyn ee nugul iyo xadgudubka iyo dayaca loo geysto carruurta.

Daryeel bixiyeyaasha waa in ay ka soo baxaan mas'uuliyadahan soo socda si ay uga hortagaan xadgudubka iyo dayaca:

- Waa in ay ogaadaan baahiyada shakhsiyaadka la taageero oo ayna leeyihiin awoodda lagu bixinayo taageeradaasi.
- Waa in ay wayddiistaan tababar iyo kaalmo haddii loo baahan yahay.
- Waa in ay qiimeeyaan xaaladda oo ayna wax ka qabtaan waxa la arkey.
- Waa in ay ku wargeliyaan kormeerayaasha iyo DSHS haddii ay isbeddelaan ama aan laga soo bixin baahiyada taageerada shaqsiya.

Calamada Guduudan – Tilmaamayaasha silcinta suuragalka ah

Qofka Nugul

- Nadaafada shaqsiyeed ee liidata
- Dhar aan ku habbooneyn xaaladaha cimilada
- Dilaacyo maqaarka ah ama nabarro aan la caddayn
- Hoosgashi dhiig leh, jeexjeexan, ama wasakhaysan; nabarro ama dhiig-bax, xanuun ama cuncunka xubnaha taranka ama futada ah oo aan la caddayn
- Gooni-ahaansho ama ka goosashada dadka
- Isbeddelo ku yimaada hab-dhaqanka oo aan la caddayn
- Niyad-jab ama murugo
- Isku-dhexyaaca caadooyinka hurdada ama wax cunista
- Cabashooyin jireed mugdi ku jira oo aan laheyn sabab la aqoonsan karo
- Oraahayn ku saabsan dareenka ah in qofka uusan qiimo lahayn
- Ooya ama dagaalaw ah marka daryeel bixiye gaar ah uu shaqada ku jiro, marka qof gaar ah uu soo booqdo, ama marka ay la joogaan qof gaar ah (tusaale, darawalka baska)
- Dhaawacyada cadaadiska
- Cabashooyinka in waxyaabo uu shaqsi ahaan u leeyahay ay ka maqan yihiin



Deegaanka Guriga

- La'aanta dhiirigelin dhimir oo ku filan ama taageero dareen
- Caddeynta ama jiritaanka khatarro caafimaad ama bedqab
- Xannibaad kiimiko ama jireed
- Siinta cunto ama biyo aan ku filneyn
- Weerarro afka ah; cabsigelin ama hanjabaadyo
- Dhiigmiirashada maaliyadeed ee cuntada ama lacagta ah

Cidda ay tahay in ay ka soo warbixiso?

- Haddii daryeelayaasha lacag lagu siiyo in ay daryeel siiyaan qof qaba naafonimo koriin ama maskaxeed, waxaa loo arkaa in ay yihiin ka soo warbixiyeyaal ku khasban. Waa in ay u soo sheegaan xadgudubka ama dayaca, dayrinta, ama dhiigmiirashada maaliyadeed maamullada ku habboon.
- Gobolka Washington waxaa uu leeyahay sharciyo ugu baahan kooxaha kale, (sida sharci fulinta iyo bixiyeyaasha adeegga caafimaadka) in ay sidoo kale ka soo warbixiyaan silcinta ama si xun ula dhaqmidda laga shakiyey.
- Ka soo warbixiyeyaasha ku khasban waa in ay waqti kasta raacaan sharciya, kaliya ma ahan inta ay ku guda jiraan saacadaha shaqada.
- Haddii daryeel bixiyaha uusan soo sheegin silcinta lagula kaco carruurta ama dadka waaweyn ee nugul:
 - Shaqsiya la daryelayo waxaa uu ku sii jiri karaa silcinta.
 - Daryeelaha waxaa loo qabsan karaa mas'uuliyadda in uu ka gaabiyay soo sheegidda. Xaaladaha qaarkood, ka gaabinta soo sheegidda waxaa ay keeni kartaa dambi ku soo oogid.

Goorta la soo sheegayo

- Warbixinnada ku saabsan dadka waaweyn ee nugul waa in “si degdeg ah,” loo sameeyo sida uu qabo xeerka [RCW 74.34](#)
- Warbixinnada ku saabsan xadgudubka carruurta waa in “si degdeg ah,” loo sameeyo kama dambeys 48 saacadood sida uu qabo xeerka [RCW 26.44](#)

Cidda ay tahay in loo sheego

Wac 1-866-END-HARM (1-866-363-4276) si aad u soo sheegto xadgudubka carruurta ama dayaca laga shakiyay ama xadgudubka dadka waaweyn, dayrinta ama dhiigmiirashada maaliyadeed. Wacitaannada waxaa loo diri doontaa hay'adda ku habboon. Dadka waaweyn ee nugul, warbixin [online ah](#) ayaa la soo gudbin karaa.

Adeegyada Ilaalinta Carruurta:

- Carruurta ka yar da'da 18 sano
- Carruurta ku jirta barnaamijyada daryeelka korsashada ama degaan shaqaale jooga oo shatiyeysan (ama dambiilaha eedaysan uu yahay daryeel bixiye)

Adeegyada Ilaalinta Carruurta:

- Dadka waaweyn ee nugul
- Carruurta 18-21 (haddii dambiilaha aannu la xiriirin meelaynta daryeelka korsashada ama goobaha degaanka shaqaalaha jooga ee shatiyeysan)

Adeegyada Daryeelka Degaaanka:

- Arrimaha hay'adda/bixiyaha shaqada (goobaha degaanka ah ee la aqoonsan yahay ama shatiyeysan)

U sheegidda sharci fulinta:

- Haddii dhibbanaha eedda uu yahay cunug, u sheeg sharci fulinta ama Adeegyada Ilaalinta Carruurta. Hase-yeeshee, hab-dhaqanka ugu wanaagsan waa in labadaba loo sheego.
- Haddii dhibbanaha eedda uu yahay qof weyn oo nugul, daryeelayaasha waa in ay u soo sheegaan sharci fulinta iyo Adeegyada Ilaalinta Dadka waaweyn xaaladahan:
 - Weerar galmo
 - Weerar jireed (aan macmiil ahayn ilaa macmiilka)
 - Falalka keena cabsi laga qabo waxyeello aad u dhow
- Weerar jireed (macmiil ilaa macmiil) oo ka dhasha dhaawac jireed oo u baahan in ka badan gargaarka degdegga ah ama:
 - Dhaawac dhabarka, wejiga, madaxa, qoorta, xabadka, naasaha, meesha ay ku yaaliin xubnaha taranka, gudaha bowdada, barida, xubnaha taranka, futada iyo agagaarkeeda
 - Jab
 - Iskudayo ceejin
 - Weerarro isdabajoog ah oo u dhaxeeya macaamiil isku mid ah ama ku lug leh isla hal macmiil
 - Cabsi laga qabo waxyeello aad u dhaw in ay timaado
 - Haddii uu codsado macmiilka, wakiilka sharciga ama qoyska iyada oo aan la eegayn dhaawaca

Si degdeg ah u soo sheeg xadgudubka iyo dayacaada laga shakiyay. Haddii qof uu khatar degdeg ah ku jira ama uu u baahan yahay caawimo degdeg ah, wac 911!

Baare Caafimaad/Qofka Baara Sababta Dhimashada:

- Dhimashooyinka la tuhsan yahay in ay sabab u yihiin xadgudub, dayac, ama dayrin

Goorta laga warbixinayo

Kuwa ka warbixinaya waxaa la wayddiin doonaa in ay bixiyaan macluumaadka hoos ku xusan.

Waa hagaag haddii macluumaadka dhammaantiisa aan la heli karin; weli warbixinta samee:

- Macluumaadka xiriirka, cinwaanka, iyo magaca dhibbanaha eedda
- Haddii dhibbanaha uu yahay cunug – da'diisa, iyo magaca iyo cinwaanka waalidiintiisa, ama qofka ka mas'uulka ah
- Macluumaadka xiriirka, cinwaanka iyo magaca dambiilaha eedaysan
- Faahfaahinno ku saabsan waxa dhacay
- Macluumaadka kale ee laga yaabo in ay muhiimka yihiin, sida eedaymaha ama dhacdooyinka kale ee la midka ah
- Macluumaadka xiriirka ee loogu talagalay su'aalaha dabagalka ee ka yimaada dambi-baaraha

Ka hortagga xadgudubka iyo dayaca:

- Baro calaamadaha iyo astaamaha lagu garto xadgudubka, dayrinta, dayaca, iyo dhiigmiirashada maaliyadeed.
- La hadal qofka la daryeelayo. Dhageysiga wuxuu bixin karaa fursado lagu helayo kaalmo.
- Bar qofka waxa ay yihiin xadgudubka iyo dayaca, iyo sida ay u ekyihiin xiriirrada caafimaadqabka leh.
- Ku caawi in ay aqoonsadaan:
 - Qof lagu kalsoon yahay oo ay la hadli karaan.
 - Sida loo dhaho “maya.”
 - Qorshe loogu talagalay waxa ay sameyn karaa haddii qof uusan si wanaagsan ula dhaqmeynin.



Ilaaha & Kheyraadka:

- [Sheegidda Xadgudubka Laga Shakisan Yahay, Dayaca, Is-Dayacidda ama Dhiigmiirashada Maaliyadeed ee Dadka Waaweyn ee Nugul](#), Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada
- [Ka Soo Warbixi Xadgudubka Carruurta ama Dayaca](#), Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska
- [Qalabka Iswata ee Ka Soo Warbixiyaha Ku Khasban](#), Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska